# Xaqiijinta in adeegyada boliiska ay yihiin kuwo haqabtira baahida London

## Muxuu yahay MPA?

Waaxda Booliska Metroboolitanka (The Metropolitan Police Authority) waxaa loo hirgeliyey xaqiijinta in boliiska London ay mas'uul ka yihiin adeegyada ay u tebiyaan dadka caasimadda.

Hawlaha waaxda boliiska waa:

- xaqiijinta in si joogto ah loo hormariyo habka boliiska London ay u fuliyaan hawlahooda
- ikor u qaadidda kalsoonida bulshada iyo aaminida boliiska London
- la kaashiga jaaliyadaha kala duwan ee London taasi oo looga gol leeyahay ogaanta waxyaabaha ay ka filayaan in uu u qabto boliiska
- agaasimidda miisaaniyadda ku baxda boliiska
- soo saaridda qorsho sanadeedka ee hawlaha boliiska taasi oo caddeyneysa hadafla laga doonayo boliiska.

Waaxda Booliska Metroboolitanka (The Metropolitan Police Authority - MPA) waxay dadka ku nool London usoo hoyisay guulo waxtar leh. Kaalmada waaxda boliiska ayaa lafdhabar u ahayd hirgelinta 630 kooxood ee Ammaanka Neybahuudhka ee caasimadda. Koox kasta oo ka kooban saraakiisha boliiska Saraakiisha Boliiska ee Kaalmada Bulshada (Police Community Support Officers), waxay u hogaansan tahay sidii bulshada loogalakaashan lahaa ka hortegidda waxyeelooyinka asluub xumida ( anti-social behaviour), dembiyada iyo ka cabsida dembiyada.

Qorsheynta iyo maamulka miisaaniyadda boliiska £3 bilyan ee sanadka ayaa a mas'uuliyiinta ugu weyn  ee saaray Waaxda. Ilaa 78% ee miisaaniyadda waxay ka timaaddaa dowladda dhexe, inta kale waxay ka timaaddaa lacagta Caanshuurta Konsolka ee uu Duqa Magaalada ka soo uruuriyo xaafadaha London.

Waaxda waxay hirgelineysaa sinaanta iyo kala duwanaanshaha ee adeegyada boliiska waxayna ku dadaalayaan I dhammaan dadka ku nool ama ka shaqeeya London loola dhaqmo si xurmad iyo ixtiraam leh.

## Hawlgalka MPA

MPA waxay leedahay 23 xubnood - tusaale. 12 xubnood oo laga soo doortay Xubnaha Golaha ee London (London Assembly Members), 4 xeer ilaaliyeyaal (magistrates) iyo 7 xubnood oo madaxbannaan, dhammaan loo soo doortay 4 sano.

Xubin kasta wuxuu ku xira yahay mid ka mid ah gobllada London wuxuuna mas'uul ka yahay la kaashiga boliiska iyo hay'adaha kale ee qaabilsan ammaanka si kloo dhimo dembiyada. Waaxda waxay aaminsan tahay in iskaashiga ay tahay sheyga ugu muhiimsan ee lagu sugi karo ammaanka London.

Xubnayaasha si joogto ah ayey u kulmaan waxayna ka hadlaan qaynuunada boliiska iyo waxqabadka boliiska. Waxay soo ansixiyaan isbeddello keeni karo horumar isla markaana kaafin karo baahida bulshada London.

## Dhageysiga dadka reer London

Doorka ugu muhiimsan ee hawsha MPA waa la kaashiga dadka reer London taasi oo ay kala kaashadaan arrimaha boliiska, waxqabadkooda iyo sida loo hormarin lahaa.

La kaashiga waxay MPA ka caawineysaa fahmidda waxyaabaha mudnaanta leh ee hawsha boliiska ee sanadka soo socda.

Hababka la kaashiiga waxaa ka mid ah:

- **Guddiga Nabadgelyada London**
  Guddiga waaxda oo ka kooban xubnayaal bulshada ka socda oona ka kooban 3,000 qof oo matalaya dadweynaha ee bulshada London. Waxaa la weydiyaa aragtida ay ka qabaan hawsha boliiska ee London is policed.

- **Doorka bulshada ee gobol kasta ee London ka mid ah**
  MPA waxay ku dadaashay xaqiijinta in dadweynaha gobol kasta ay leeyihiin waddo ay kula xiriiraan boliiska xaafaddooda.

Tanina waxay sida badan u dhacdaa habka Kooxda Bulshada ee Lakaashiga Boliiska (Community Police Consultative Group), illaase gobo qaar ayaa leh hab kaasi ka duwan oo la dhaqangelinayo.

MPA waxay ka qaybgashaa dhacdooyin badan iyo qabanqaabinta barnaamijyo ay bulshada caasimadda ka qaybgeli karaan.Faafaahinta dhacdooyinkaasi waxay ku qoran yihin boggeena intarneetka.

## Kulamada daweynaha ee MPA

Kulamada guddiga ee MPA waa kuwo u furan dadweynaha, qof kastana wuu ka soo qaybgeli karaa. Taarikhda, saacadda iyo warbinada ee kulamadani waxay lagu soo qoraa bogga intarneetka ee MPA, iyo waxaa kaloo laga heli karaa xaruumaha maktabadaha dadweynaha.

Qolalka kulamada ee daweynaha waa kuwo lala soo geli karo gaariga kursiga curyaanka (wheelchair) waxayna leeyihiin meel lagala hadli karo. Qalabyada gaarka (special facilities), ayna ka mid tahay, Luqadda Dgegooleyaasha (BSL) turjubaano iyo Teebisteyaasha Indhooleyaasha (palantypists) kuwaasi oo laguu sii diyaarin karo shirka ka hor.

Waaxda Boliiska Metroboolitanka:

- keenidda guulo waxtar u leh London
- ka dhigidda boliiska kuwo qaabilsan dadka London
- la shaqeynta daweynaha si London looga dhigo caasimadda ugu ammaansan adduunka.

### *La xiriiridda MPA (weydiimada guud)*

Tel: 020 7202 0202
Minikom: 020 7202 0173
Fakis: 020 7202 0246
Iimeyll: enquiries@mpa.gov.uk

Ama usoo qor:

Enquiries
Metropolitan Police Authority
10 Dean Farrar Street
London SW1H 0NY

## Turjumidda akhbaarta MPA

Akhbaarta ku qoran boggeena intarneetka lama turjumin. Illaase haddaad u baahan tahay in dukumeentiyada afkaaga laguu turjumo waa laguu sameyn karaa haddaad soo cdsatid. Sida ugu dhaqsaha badan ayaan kuugu soo turjumi doonaa.

Haddaad u baahan tahay turjumaad, fadlan la soo xiriir:

Online Communications
The Metropolitan Police Authority
10 Dean Farrar Street
London
SW1H 0NY

Iimeyl: webenquiries@mpa.gov.uk
Tel: 020 7202 0219
Minikom: 020 7202 0173
Fakis: 020 7202 0241